Wada shaqayn kooxeed

Natiijada ugu wanaagsnan awgeed, waxaad u baahan doontaa in aad waqti geliso maalin walba si aad ula socoto qorshaha aad adiga iyo dhaqtarka hadal barashadu isla meel dhigteen. Haddii uu waqtiga dhib ka yimaado, kala hadal dhaqtarkaaga hadal iyo af barasho sidaad u heli lahaydeen kaalamada ugu wanaagsan ee suurto galka u ah cunuggaaga.

Marka adiga iyo qoyskaagu aad ku hawlanaataan, waad ka caawin kartaan cunugga in uu barto xirfadaha afka iyo luuqad si uu u gaaro meeqaankiisa ama keeda ay tiigsanayaan.

Si aad u hesho faahfaahin dheeri ah la xiriir Barnaamijka Luuqad iyo hadal barad dugsiga hortii ee xaafaddaada ama Barnaamijka Maqalka Dhallaanka, ama Adeegga Dawladda Ontario ee hoos ku xusan.

Faahfaahin dheeri ah kala xiriir:

ServiceOntario
1-866-821-7770
TTY 1-800-387-5559
www.ontario.ca/children

Si aad u dalbato nuskhado dheeri ah, gal shabakada:

www.serviceontario.ca/publications

Ama wac:

1-800-668-9938
TTY 1-800-268-7095

Stock number: 014871 SOMALI
April 2010 © Queen's Printer for Ontario, 2010

BARNAAMIJKA AF IYO LUUQAD BARASHO EE DUGSI HORTII (PRESCHOOL SPEECH AND LANGUAGE PROGRAM)

BARNAAMIJKA MAQALKA DHALLAANKA (INFANT HEARING PROGRAM)

Ka kaalmaynta cunuggaaga af barashada

Ontario

Ku caawin Cunuggaaga waxbarasho

Barnaamijka Luuqad iyo Hadal Dugsi hortii ee Ontario iyo Barnaamijka Maqalka Dhallaanka waxay bixiyaan kaalmo markaad bilowdo in aad ka caawiso cunuggaaga in uu ama ay bartaan xirfadaha af barashada.

Ku hawlanaantaada caawinta cunuggaaga siduu ku af baran lahaa waa muhiim wax tar ah. Caruurtu waxay wax ku bartaan la xiriiridda dadka muhiimka u ah noloshooda. Waalid ahaan, waxaad tahay macalinka ugu wanaagsna ee cunuggaaga waayo adiga ayaa ilmahaaga ka aqoon og qof kasta oo kale. Waxaad joogtaa booska ugu wanaagsan ee lagu caawiyo in uu ama ay ku bartaan wada hadal.

Waa maxay af barashadu?

Luuqad ama af barashadu waa nidaam joogto ah. Dhallaanku waxa uu ku bilaabaa af barashada in uu isticmaalo hadaaq (baables iyo kuus), dabadeedna waxa uu bilaabaa in uu iska keen keeno erayo iyo in uu fahmo macnahooda. Tartiib tartiib ayuu ilmuhu u bilaabaa erayo isku xir kadibna erayada fudud uga sii gudbaa sheekooyin isku qasan.

Cunuggu waxa uu ka daahaa af barashada ama noqdaa mid aan caadiga ahayn haddii uu dhib ku qabo fahamka erayada ama isku xirkooda si uu ugu hadlo uguna guto baahiyadiisa iyo fikradihiisa.

Caawin cilmiyeysan

Hadaad ka shakiso in ay af barshada cunuggaagu dib u dhacsan tahay, waa muhiim in aad si dhaqso ah u doonto kaalmo cilmiyeysan.

Inkastoo aad tahay qofka ugu wanaagsan af baritaanka ilmahaaga hadana keligaa kuma tihid. Waxaad qayb ka noqon doontaa koox ku takhsustay af iyo hadal baridda.

Xirfadlayaalkaani waxay kaa caawin doonaan in aad garato, qiimayso daawaysana carrab dalabta af barasho aadna ku taageerto hadal barashada. Waxaa kale oo laga yaabaa in aad si hoose ula shaqayso xirfadlayaal kale, ayna ku jiraan kaaliyeyaal wada hadal, la taliyeyyaal Calaamadaha Luuqadeed ee Ameerika (American Sign Language), daaweeyeyaal hadal iyo maqal, iyo barayaal caruurta yar yar ee asaasiga ah,si ay adiga iyo ilmahaagaba idiin caawiyaan.

Xirfadlayaalkaani waxay ku tusinayaan sida loola sheekaysto loolana cayaaro ilmahaaga markaad guriga la jogoto si aad ugu dhiirri geliso uguna taageerto af barashada.

Dawrka qoyskaaga

Luuqad iyo Hadal Dugsiga hortii iyo Barnaamijka Maqalka Dhallaanka waxay ku taagan yihiin ku lug lahanata qoyska ilmaha maadaam ay yihiin furaha hinqiya ama kiciya xirfadaha af barashadooda.

Dhaqan dhaqaalaha qoyska, caadooyinka iyo bii'ada kulligood waxay dawr ka cayaaraan in ay caruurtu bartaan dunidooda, dadka ku waraagsan noloshooda iyo sida loola sheekaysto. Haddaba, waalid ahaan, waa shaqadaada in aad xirfadlaha siiso macluumaad tifa tiran iyo waxa uu cunuggaagu ku fiican yahay iho waxa uu ubaahan yahay. Jidkaas ayaad ku caawin kartaa hadafka lagu caawinayo in uu cunuggaagu af barto taas oo u shaqayn doonta qoyskaaga.

Helitaanka dariiqadda saxda ah ee qoyskaaga

Waxaa jira dariiqooyin badan oo kala duwan oo looga caawiyo ilmaha hadal barashada. Tusaale, laga yaabee in ay dhaqaatiirta hadal iyo luuqad barashadu kaala shaqeeyaan sidaad u bilaabi lahayd barnaamij lagugula sii xiriirayo guriga ama laguugu habaynayo in aad ku biirto kulano rasmi ah ood la yeelanayso waalidiin kale iyo caruur kale.

Dhaqtarla hadal iyo af barashadu waa tallaabada kowaad ee aad ku qiimaynayso hadalka iyo awoodda luuqad barasho ee ilmahaaga. Kaalmadaada awgeed, waxay ama wuxuu kula dejin doonaa hadafyo kaalana hadli doonaa sida ugu wanaagsan eed ku wada shaqayn lahaydeen. Dhaqtarka hadal iyo af barashadu waxa marka ka dib ku siinayaa jadwalka aad ku wada shaqyn lahaydeen adiga iyo cnugggaagu, ood uga kaalmayn lahayd ugu yaraan mid ka mid ah labadaan:

- tababo barka tacliiminta waalidka
- kulamo kooxo yar yar
- wada tashi
- barnaamij guri.

Kulamo aad la yeelanayso xirfadlayaal, shakhsiyaad ka socda qoysas kale iyo xanaano caruur ayaa ku jira, haddaba qof kasta wuu baran karaa siyaabaha loo caawiyo horumarinta cunuggaaga intuu ku guda jiro hawlihiisa maalinlaha ah. Waxaad heli doontaa tabo si wacan kuu taageera ooy ku jiraan, tusaale, ku talin buugaag la akhriyo iyo geemam lagu cayaaro guriga. Waxaa kale oo laga yaabaa in lagu weydiiyo in aad filin ka soo duubto hor u kaca cunuggaaga, kaydiso joornaal ama aad buuxiso foomam su'aalood oo ku saabsan hor u kaca cunuggaaga.